



## **Boortalka Adeegga Magaalada Greeley - Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo**

### **1. Waa maxay Boortalka Adeegga Magaalada Greeley ee cusub?**

Magaalada Greeley waxay ku faraxsan tahay inay bilawdo boortal cusub oo adeegga ah bisha Noofambar 2025. Boortalka Adeegga Magaalada Greeley wuxuu bedeli doonaa nidaamka biilasha biyaha ee hadda jira iyo barnaamijka WaterSmart.

### **2. Muxuu Greeley ugu guurayaa nidaamka biilasha adeegga ee cusub?**

Boortalka Adeegga Greeley ee cusub wuxuu fududayn doonaa in biilasha lagu bixiyo onlayn iyo maamulida isticmaalka biyahaaga - dhammaan hal meel. Macaamiishu ma sii geli doonaan laba nidaam oo kala duwan si ay u helaan macluumaadkooda.

Boortalka Adeegga ee cusub ee Greeley waa qayb ka mid ah dadaallada magaalada si loo horumariyo adeegyada magaalada iyo bixinta khibrad wanaagsan oo macmiil.

### **3. Goorma ayaa la bilaabayaa Boortalka Adeegga ee cusub?**

Boortalka Adeegga ee cusub ee Greeley wuxuu bilaabmi doonaa Noofambar 2025. Waqtigaas, nidaamkii biilasha adeegga ee hore lama heli doono. Fadlan booqo websaydkayaga [greeleyco.gov/my-utilities](https://greeleyco.gov/my-utilities) wixii ku soo kordha taariikhda la bilaabay.

### **4. Waa maxay faraaqa u dhexeeya Boortalka Adeegga ee cusub iyo nidaamkii hore ee biilasha adeegga?**

Boortalka Adeegga Greeley ee cusub wuxuu kugu siinayaa marin u helka biilashaada biyaha iyo xogta isticmaalka biyaha hal meel. Uma baahnid inaad gasho laba akoon oo kala duwan si aad macluumaadkaaga u gasho. Nidaamka cusubi wuxuu bixiyaa khibrad aad u wanaagsan wuxuuna u leeyahay faa'iidooyin badan macaamiisha adeegga biyaha Greeley.

### **5. Waa maxay faa'iidooyinka Boortalka Adeegga ee cusub?**

Boortalka Adeegga Greeley ee cusub waa fududahay in la isticmaalo wuxuuna bixiyaa faa'iidooyin ka waaweyn nidaamka hadda jira:

- Ku bixi adeegyadaada biyaha iyo bulaacada isla markiiba onlayn.
- Deji lacag-bixinno toos ah si aadan weligaa ula daahin lacagta.

- Arag isticmaalkaaga biyaha iyo sida ay wax u socdaan - ogow korodhada degdega ah ee muujin kara daadasho. Nidaamku wuxuu xitaa kuu soo diri doonaa digniinaha daadinta!
- Helitaanka khayraadka iyo dhiirigalinta tashiilidda biyaha deegaanka.
- Ku hel waxaas oo dhan iyo in ka badan hal oo meel ku habboon!

## **6. Wali ma awoodi doonaa inaan galo WaterSmart?**

Marka Boortalka Adeegga Greeley ee cusub la bilaabo Noofambar 2025, WaterSmart lama heli doono. Macluumaadka isticmaalka biyahaaga iyo agabyada la xidhiidha waxa laga heli doonaa Boortalka Adeegga ee cusub ee Greeley.

## **7. Goorma ayaan iska diiwaangeliyaa xisaab cusub?**

Waxaad samayn kartaa akoonkaaga cusub isla marka Boortalka Adeegga Greeley ee cusub la bilaabo Noofambar 2025. Booqo websaydkayaga [greeleyco.gov/my-utilities](https://greeleyco.gov/my-utilities) wixii ku soo kordha taariikhda la bilaabay.

## **8. Sideen u samaysan karaa akoonkayga cusub?**

Marka Boortalka Adeegga Greeley ee cusub la bilaabo Noofambar 2025, waxaa jiri doona linki 'Create Your Account New' [greeleyco.gov/my-utilities](https://greeleyco.gov/my-utilities). Boggan waxa kale oo ka muuqan doona tilmaamo tallaabo-tallaabo ah, fiidiyowyo casharro ah, iyo khayraad caawimo dheeraad ah.

Hubso inaad isla markaaba isdiiwaangeliso si aad u hubiso sii gelitaanka akoonkaaga adeegga biyaha.

## **9. Ma inaan samaystaa akoon cusub? Maxaa dhacaya haddii aanan samayn?**

Biilka khadka tooska ah ee hadda macaamiishu waa inay ka abuuraan akoon cusub Boortalka Adeegga Greeley ee cusub si ay u sii wadaan bixinta lacag si otomaatig ah.

Macaamiisha aan hadda isticmaalin lacagta biilka ee onlaynka ah loogama baahna inay abuuraan akoon cusub, laakiin si aad ayaa loogula talinayaa. Samaynta akoonku waxay kuu ogolaanaysaa inaad samayso lacag-bixinno otomaatig ah, gasho xogta isticmaalka biyaha, aqoonsato siyaabaha aad ku dhimi karto khasaaraha biyaha iyo wax ka badan.

## **10. Maxaa dhacaya haddii aanan samayn akoon cusub?**

Haddii aad hadda tahay macmiil biilka onlayn ku bixiya ama si otomaatig ah, akoonkaaga waxa uu sii dooran doonaa biilasha waraaqaha ah haddii aadan akoon ku samayn Boortalka Adeegga Greeley ee cusub.

Haddii aad hore u heli jirtay biilasha warqadda, waxba isma beddelayaan — waxaad sii wadi doontaa inaad biilashaada ku hesho boostada.

### **11. Wali miyaan ku heli karaa biilka warqadda boostada?**

Haa, waxaad sii wadi kartaa inaad ku hesho biilasha warqadda boostada haddii aadan akoon ka samaysan Boortalka Adeegga Greeley ee cusub.

### **12. Ma ku bixin karaa onlayn aniga oo aan isticmaalin lacag-bixinta otomaatigga ah?**

Waxaad lacag-bixinaha hal mar ku samayn kartaa onlayn adigoo u marayo Boortalka Adeegga Greeley ee cusub adiga oo aan isticmaalin lacag-bixinta otomaatigga ah.

### **13. Wali wax ma ku bixin karaa nidaamkii hore ee biilasha adeegga?**

Waxaad ku sii wadan kartaa lacag-bixinta nidaamka biilasha adeegga ee hadda jira ilaa laga gaarayo bilaabidda Boortalka Adeegga Greeley ee cusub ee Noofambar 2025. Waqtigaas, nidaamkii biilasha adeegga ee hore ma sii jiri doono, lacag-bixinnada onlaynka ah waa in lagu sameeyaa nidaamka cusub.

### **14. Sideen ku heli karaa caawimo abuurista akoonkayga cusub?**

Marka Boortalka Adeegga Greeley ee cusub la bilaabo Noofambar 2025, khayraad kala duwan ayaa diyaar noqon doona si ay kaaga caawiyaan abuurista akoonkaaga cusub. Agabkaan waxaa ka mid ah tilmaamo tallaabo-tallaabo ah, fiidiyowyo casharro ah, taageerada xarunta adeegga macaamiisha iyo caawinta fool-ka-foolka ah ee maktabadaha maxalliga ah.

### **15. Caawimo ma lagu heli karaa luuqado kale?**

Caawinta ayaa lagu heli doonaa luuqado badan si ay kaaga caawiso abuurista akoonkaaga cusub. Tan waxaa ku jira khayraadka onlaynka ah, taageerada xarunta adeegga macaamiisha iyo caawinta fool-ka-foolka ah ee maktabadaha maxalliga ah, markaan qaar ka xusno.

### **16. Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Boortalka Adeegga Greeley ee cusub?**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Boortalka Adeegga Greeley ee cusub:

- Booqo websaydkayaga [greeleyco.gov/my-utilities](https://greeleyco.gov/my-utilities)
- Nagala soco baraha bulshada (Instagram: @cityofgreeley; Facebook: City of Greeley Government)
- Iska diiwaan geli Warsidahayaga Biyaha & Bullaacada [greeleygov.com/water](https://greeleygov.com/water).